King County

Department of Community and Human Services
Mental Health, Chemical Abuse and Dependency Services Division
Chinook Building, CNK-HS-0400
401 Fifth Avenue, Suite 400
Seattle, WA 98104
206 263-9000 TTY/TDD: 206-205-0569
www.kingcounty.gov/healthServices/MHSA

"Ogeysiiska Ku-dhaqanyada Khaaska Ah" ee soo socda waxa ku jira macluumaad ku saabsan sida Qorshaha Caafimaadka Maskaxda ee Deeganka King uu u isticmaalo oo una ilaaliyo diiwaannadaada caafimaadka maskaxda. Kani waa ogeysiis qoral ah oo adiga lagu siinayo si aad u raacdo sharciga la yirahdo HIPAA.[1]

I. Qeybta 1 ee Ogeysiiska Ku-dhaqanyada Khaaska Ah waxa uu sharxaya xuquuqda ku saabsan diiwaannada caafimaadkaaga.

II. Qeybta 2 waxa uu sheegaya waxa ku saabsan waajibaadka Qorshaha Caafimaadka Maskaxda ee Deeganka King ee la xiriira haynta diiwaannada khaaska ah ee caafimaadkaaga iyo in lagu siiyo nuqul ogeysiiska.

III. Qeybta 3 waxa ay sharxaysa sida Qorshaha Caafimaadka Maskaxda uu isticmaali karo ama laga wadaagi karo diiwaannada caafimaadkaaga ee daawayntaada, lacag bixinta xanaanadaada, iyo sababo kale.

IV. Qeybta 4 waxa ay sharxaysa sidii aad gargaar u weydiinsanlahayd si aad u fahamtid xuquuqdaada ama u samayn lahayd cabasho ku saabsan ku-dhaqanyada khaaska ah.

Fadlan ka eeg Ogeysiiska wixii macluumaad buuxda oo dheeraad ah.

[1] Health Insurance Portability and Accountability Act (Sharciga Caymiska Caafimaadka ee La Qaad-qaadi karo iyo La Xisaabtanka)

Department of Community and Human Services
Mental Health, Chemical Abuse and Dependency Services Division
Chinook Building, CNK-HS-0400
401 Fifth Avenue, Suite 400
Seattle, WA 98104
206 263-9000 TTY/TDD: 206-205-0569
www.kingcounty.gov/healthServices/MHSA

OGEYSIIS KU-DHAQANYADA KHAASKA AH

Caafimaadka Maskaxda ee Deegaanka King, Waaxda Isticmaalka Xun ee Kiimikada iyo Adeegyada Ku Tiirsanaanta
Qorshaha Caafimaadka Maskaxda

Taariikhda Dhaqangalka: Abriil 14, 2003

OGEYSIISKANI WAXA U SHARXAYA SIDA MACLUUMAAD CAAFIMAADEED EE ADIGA KU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOONA BIXIN KARO IYO SIDA AAD AWOOD U HELI LAHAYD IN AAD HESHID MACLUUMAADKAN.

FADLAN SI TAXADAR LEH DIB-U HUBI

Caafimaadka Maskaxda ee Deegaanka King, Waaxda Isticmaalka Xun ee Kiimikada iyo Adeegyada Ku Tiirsanaanta (MHCADSD) way ixtiraamaan kali ahaanshadaada. Waan garaneyna in macluumaadka caafimaadkaaga khaaska uu yahay mid aad loo dareemi og-yahay. Ma siin doono macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga kuwa kale haddii-aadan noo oggolaan in aan sida samayno, ama sharcigu noo fasaxo ama inooga baahdo in aan sida samayno.

I. Xuquuqahaaga Macluumaadka Caafimaadka

Waxa aanu hayn doona diiwaan ku saabsan caafimaadkaaga. Waxa aad leedahay dhawr xuquuqood oo ku saabsan macluumaadkan kuna jirto xaqa in aad:

- Codsatid xaddaynyo isticmaalkayaga ama bixinta macluumaad caafimaad ee ku saabsan daawayntaada, lacag bixinta ama hawl qabadyo daryeel caafimaadeed. Waa in aad u gaysa codsigan oo qoral ah Sarkaalka Kali Ahaanshada ee xafiiskayaga. Sarkaalka Kali

Ahaanshadu waxa uu ku weydiin doona in aad saxiixdid codsiga foomka xaddaynta, oo loo baahanyahay in aad buuxisid una soo celisid Sarkaalka Kali Ahaanshada. Loogama baahna annaka in aan aqbalno codsigaaga xaddaynta ah.

- Jooji fasixitaanadii horey ee isticmaalidda ama bixidda macluumaad caafimaadeed adiga oo nasiinaya ogeysiis qoral ah. Foom ayaa u diyaar ah ujeedadan. Tir-tiridaadu ma khuseenayso macluumaadkii horey ee la sii-deyey. Sidoo kale tir-tiriddu ma khuseyso ficilkii la qaaday ka hor intii aan la helin qoralka tir-tiridda.
- Naga hel annaga nuqulka warqaddan Ogeysiiska Ku-dhaqanyada Khaaska ah ee loogu tala galay Macluumaadka La Ilaaliyey ee Caafimaadka ("Ogeysiis").
- Codso in laguu oggolaado in aad baartid oo isla markaana gadatid nuqulka diiwaanka caafimaadkaaga. Codsigan waa inaad ka dhigtaa mid qoral ah. Waxa aanu heyna foom diyaar oo loogu tala galay codsiga noocan oo kale ah. Haddii codsigaaga la diido, rafcaan ayaad ka qaadan karta diidmadan (na weydi in aanu dib u-tixgelinno). Racfaankani waa in uu qoraal ahaada.
- Codso in aannu beddelno qaar ka mid ah macluumaadka caafimaadka ee aanu isticmaalno si aan talooyin ku gaadhno ku saabsan daryeelkaaga, oo ku jirto daawayntaada ama diiwaannada lacag bixinta. Si aad tan u sameysid, waa inaad u keenta codsi qoraal ah Sarkaalkayaga Kali-ahaanta ee ku yaal 401 Fifth Avenue, Suite 400, Seattle, WA 98104 noona sheeg sababta aad u aaminsantahay in macluumaadku uu khaldanyahay. Waa aanu diidi karna codsigaaga beddelka ah haddii uuna qoral ahayn ama uuna ku jirin sabab taageeraysa codsiga. Waxa kale oo laga yaaba in aanu diidno codsigaaga haddii aad na weydiisid bedelidda macluumaadka caafimaad haddii:
    - anaku aanu abuurin, haddii-aysan shakhsigii ama ururkii abuuray macluumaadka caafimaad aanan la heli karin si bedelka ay u sameeyaan;
    - aanu qeyb ka ahayn macluumaadka caafimaad ee aan anaku hayno si aan talooyin ku ku saabsan daryeelkaaga gaadhno;
    - aanu qeyb ka ahayn macluumaadka caafimaad adiga laguu oggolyahay in aad baartid ama nuqul ka sameysato; ama
    - uu yahay sax uuna dhanyahay.
- Haddii aanu diidno codsigaaga la bedelayo macluumaadka caafimaadkaaga, waxa aanu kuu soo diri doona ogeysiis qoral ah ee diididda oo sheegaya sababta diididda oo isla markaana ku siinaysa fursad aad ku bixisid bayaan qoraal ah oo khilaafsan diididaa. Haddii aadan dooneyn in aad diyaarisid bayaan qoral ah oo ka soo horjeeda, waxa aad weydisan karta in codsiga bedelka iyo diiditaankayaga lagu lifaaqo dhammaan sheegitaanka macluumaadka caafimaad ee mustaqbalka ee la xiriira codsigaaga. Haddii aad dooratay in aad keentid bayaan qoral ah oo khilaafsan, waxa aanu xaq u leenahay in aanu diyaarinno qoraal beenaynaya bayaankaaga khilaafsan. Arrintan iyada ah, waxa aanu ku lifaaqi doona codsiga qoraal iyo beenaynta (iyo codsigii iyo diididii hore) dhammaan sheegidda mustaqbalka ee macluumaadka caafimaad ee la xiirira codsigaaga.
- Codso in aanu ku siinno xisaabtan sheegitaannadii aannu samayney ee macluumaadka caafimaadkaaga ilaa iyo 14 Abriil, 2003. Xisaabtanku waa liistooyin sheegitaan. Hase

yeeshe liistadan kuma jirayso sheegitaanyada qaarkood ee macluumaadka caafimaadkaaga sida kuwa loogu tala galay ujeedooyinka daawayntaada, lacag-bixin iyo hawl qabadyo daryeel caafimaadeed ama sheegitaanyo aad adigu fasaxday oo qoraal ahaan. Si aad u codsatid xisaabtan sheegitaanyo, waa inaad u keenta codsi qoraal ah Sarkaalka Kali-ahaanshada ee xafiiskayaga. Si laguugu sahlo, waxa aad u dhiibi karta codsigaaga foom la yirahdo "Request For Accounting" ("Codsiga Loogu Tala Galay Xisaabtanka"), oo aad ka heli kartid Sarkaalkayaga Kali Ahaanshada.

- Na weydii in aanu xiriir yeelano oo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga in uu ahaado mid hal meel oo qura ama uu maro hab gooni ah. Si aad u codsatid xiriirkan qarsoodiga oo kale, waa inaad codsigaaga nagu siisid qoraal, saxiixdid oo isla markaana taariikhna leh. Waxa aad codsigaaga ku soo gudbin karta foomkayaga ama warqad leh dhammaan macluumaadka ku yaala foomkaas. Codsiyadii macquulka ah oo dhan waa aanu meel marin doona. Uma baahnid in aad na siisid sababta codsiga, hase yeeshe codsigaagu waa in uu qeexa sida ama meesha aad dooneysid in lagala soo xiriiro.

II. Waajibaadka MHCADSD

Sharciga ayaa nooga bahan in aanu:

- Kali ahaansho u hayno macluumaadka caafimaadkaaga laga reebo sida hoos ku yaala;
- Ku siino Ogeysiiskan marka aad codsatid;
- Aad racdid shuruudaha Ogeysiiska Ku-dhaqnyada Khaaska ah ee iminka jira;

Waxa aanu xaq u leenahay in aanu beddelno ku dhaqanyadayada ku saabsan ilaalinta macluumaadka caafimaad ee aanu hayno. Haddii aanu sameyno isbeddelyo, waa aanu casriyayn doona Ogeysiiskan. Waxa aad heli karta nuqulkii ugu dambeeyey ee Ogeysiiskan adiga oo wacaya ama weydiisanaya ama booqanaya xafiiskayaga in aad qaadatid mid. Waxa kale oo aad nuqul Ogeysiiskan ka heli karta bogayaga shabakadda internetka ee www.kingcounty.gov/healthServices/MHSA

III. Sida Aanu u Isticmaali Karno ama u Sheegi Karno Macluumaadka Caafimaad ee Adiga ku Saabsan

Qaybaha soo socda waxa ay sharxayaan habka aanu isticmaalno ama u sheegno macluumaadka (ku jirto caafimaadka maskaxda iyo caafimaadka jirka) caafimaad. Qayb kasta ee isticmaalidda ama sheegitaanka, waxa aanu sharixi doona waxa aanu u jeedno oo isla markaana bixinno tu'saale. Lama tixi doona isticmaal kasta ama sheegid kasta ee qaybeed. Hase yeeshe, dhammaan siyaabaha naloo oggolyahay in aanu u isticmaalno ama u sheegno macluumaadka waxa ay ka mid noqon doonaan mid ka mid ah qaybaha.

Tusaalooyinka Isticmaalka ama Sheegitaanka loogu tala galay Daawaynta, Lacag-bixinta iyo Hawl Qabadyada Daryeelka Caafimaad

Loogu tala galay daawaynta:

- Macluumaadka uu helay daryeel caafimaad bixiyahaagu waxa lagu qori doona diiwaan gelinta caafimaadkaaga oo isla markaana loo isticmaali tallo goynta daryeelka adiga kugu haboon.
- Waxa aanu siin karna macluumaad takhatiir kale ama aqoonyahanno daryeel caafimaad oo daryeelkaaga ku lug leh.

Loogu tala galay lacag-bixinta:

- Waxa lacag-bixinta ka codsanna Waaxda Gobolka Washington ee Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS). Si loo oggolaado lacag-bixinyadan, DSHS waxa ay u baahantahay macluumaad sida nooca cudurkaaga, adeegyada la sameyey ama daryeelka lagu taliyey.

Loogu tala galay hawl-fulinta caafimaadka:

- Xubnaha shaqaalahayagu si caadi ah ayey dib-u hubiyaan diiwaan gelintayada si ay u qiimeeyaan tayada oo isla markana horay u mariyaan adeegyada aan adiga ku siino.

Sheegitaanyo iyo Isticmaalo Kale

Ogeysiisyo

- Waxa laga yaaba in aanu sheegno macluumaad ku saabsan adiga si aanu u caawino dadaallada raysasho ee masiibo dabiici ah.

Waxa laga yaaba in aanu isticmaalno oo isla markana sheegno macluumaadka caafimaadkaaga ee la ilaaliyo sida soo socota:

- Ila iyo inta xadka sharcigu oggolyahay in aanu sheegno.
- La xiriira kor ka warhaynta wax-qabadyada caafimaad.
- Ku saabsan u-jeedooyin caafimaadka dadweynaha iyo ujeedooyin amni sida sharcigu oggolyahay ama uu u baahanyahay.
- La sheego tuhmid ku xad gudbid ama dayac.
- Marka lagu guda jiro tallaabooyin maxkamadeed/hawl maamuleed.
- Ku saabsan ujeedooyinka hirgelinta sida sharcigu oggolyahay ama uu u bahanyahay.
- Jeelasha haddii aad ku jirto jeel ama xabsi, sida loogu baahdo caafimaadkaaga iyo caafimaadka iyo amniga kuwa kale.
- Loogu tala galay hawlo dawladeed ee takhasus ah iyo magdhaw shaqaale.
- Ku saabsan hawl-qabadyo la oggolaaday ee cilmi baaris.
- Takhtar maydka baara, baare caafimaad, ama agaasimaha aasidda.

Isticmaallada Kale

- Isticmaallo ama sheegitaanyo aanan lagu sharixin Ogeysiiskan waxa samayn doona oo qudha sida sharcigu oggolyahay ama aad adigu oggolaatay si qoraal ah.

IV. In aad Weydiisatid Caawimid ama Cabasho

Haddii aad su'aalo qabtid, doonaysid macluumaad dheeraad ah, ama aad dooneysid in aad soo sheegtid dhibaato ku saabsan maamulidda macluumaadkaaga, waxa aad la xiriiri karta Sarkaalka Kali Ahaansho ee 206-263-9000.

Haddii aad aaminsantahay in xuquuqdaadii kali ahaansho lagu xad gudbay, waxa aad u gayn karta Sarkaalka Kali Ahaansho cabasho qoraal ah ee ku yaala 401 Fifth Avenue, Suite 400, Seattle, WA 98104. Waxa kale oo aad la xarayn karta cabasho Xoghayaha Mareykanka ee Caafimaad iyo Adeegyada Aadane.

Waan ixtiraamayna xaqaaqa in aad nala xaraysid cabasho anaka ama Xoghayaha Caafimaad iyo Adeegyada Aadane. Haddii aad dooratay in aad ficilkan qaadid, kaama aanu aar-goosaneyno.

Shabakadda Internetka

- Waxa aanu leenahay shabakad internetka oo ku siinaysa macluumaad anaga ku saabsan. Si lagugu faa'iideeyo, Ogeysiiskani waxa uu ku yaala ciwaanka shabakadda internetkan: www.kingcounty.gov/healthServices/MHSA